JAMHURIYADDA

DIMOQRAADIGA SOMALIYA

# DASTUURKA

MUQDISHO — 1979

S/S GOLAHA SHACBIGA

JAMHUURIYADDA

DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

# DASTUURKA

(costituzione)

MUQDISHO — 1979

S/S GOLAHA SHACBIGA

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 46 ee 16kii Setember 1979 Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

MADAXWEYNAHA

MARKUU ARKAY : Xaanshida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY : Sharciyada 1,16,18, iyo 19 ee 1da Luulyo 1976.

MARKUU ARKAY : Oggolaanshadii Mashruuca Dastuurka J.D.S. ee ka soo baxay Shirweynihii aan caadiga ahayn ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed ee la qabtay 20-29 Jannaayo 1979.

MARKUU ARKAY : Sharciga Lr. 16 ee 20 Maajo 1979 ee Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed ku oggolaaday Mashruuca Dastuurka J.D.S.

MARKUU ARKAY : Qod. 57aad ee Sharciga L. 23 ee 16 Jannaayo 1979 kuna saabsanaa Aftida Dastuurka J.D.S.

MARKUU ARKAY : Qod. 114 Dastuurka J.D.S.

MARKUU ARKAY : Go'aankii Ansaxinta natiijada Aftida Dastuurka J.D.S. taariikhdiisuna ahayd 16 Setembar 1979 ee ka soo baxay Maxkamadda Sare.

WUXUU SOO SAARAYAA XEERKA

SOO SOCDA :

**Qodobka 1**

Waxaa dhaqan galay DASTUURKA JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA ee ku lifaaqan Xeerkan laga bilaabo 16 Setembar 1979.

**Qodobka 2**

Xeerkan waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadifa Soomaaliya.

**Madaxweynaha J.D.S.**

**Jaalle Maxamed Siyaad Barre**

## GOGOLDHIGGA DASTUURKA

**Shacbiga Soomaaliyeed ee wadajir iyo midmidba ugu halgamaya nolol sharaf leh iyo sinnaan aadaminimo ee qaaya leh, dagaalna ugu jira xasilloonida iyo nabadda joogtada ah, gudaha iyo dibeddaba, si uu u fuliyo danaha guud ee Dadweynaha xoogsatada ah, una xaqiijiyo himilooyinka waaweyn ee Kacaankiisa, midnimada Ummaddiisa, hirgelinta dhismaha Hantiwadaagga, si uu u gaaro bulsho ku dhisan caddaalad, sinnaan iyo dimoqraadiyad ijtimaaci ah ee qofkeedu gaaray garaad sare, tiro iyo taya ahaanba, una adkeeyo tiirarka Kacaankiisa iyo gobannimadiisa qiimaha weyn ugu fadhiya, dabadeedna uu u gaaro horumar degdeg ah ee siyaasadeed, dhaqaale iyo bulshaba, wuxuu go'aan ku gaaray inuu qaato Dastuurkan saldhigga u noqon doona halganka horumarinta Bulshada Soomaaliyeed, nabad iskula noolaashada, iskaashiga iyo wax wada qabsiga Ummadaha Adduunweynaha, gaar ahaan kuwa ay dantoodu si gaar ah isugu xirmi karto.**

# DASTUURKA JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

## QAYBTA KOOWAAD

Mabaadi' guud

## XUBINTA KOOWAAD

Jamhuuriyadda

**Qod· 1aad**

**(Qaranka Soomaaliyeed)**

1. Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waa Qaran Hantiwadaag ah oo ay hoggamineyso dabaqadda xoggsatada ahi, waana qayb ka mid ah Ummadda Carabta iyo Shucuubta Afrika.
2. Awoodda oo dhan waxaa leh Dadweynaha, wuxuuna ugu isticmaalayaa isagoo adeegsanaya hay'adihiisa masila.

**Qod. 2aad**

**(Calanka, Astaanta iyo Magaalo-madaxda)**

1. Calanka Qaranka midabkiisu waa buluug furan, muuqaalkiisuna waa laydi ay dhexda kaga taal xiddig cad oo shan geesley ah, madaxyo simanna leh·
2. Astaanta Soomaaliya waxay ka kooban tahay gaashaan buluug ah oo leh xiddayad

dahabiya, dhexdana ku leh xiddig shan-geesley ah oo dheeh qalin ah leh. Gaashaanka dushiisa waxaa ku yaal rukumo Carbeed ee xardhan, lehna shan madax oo dahabiya oo labada geesaha ku yaalli ay kala qaaran yihiin. Hareeraha waxaa ka haya labo shabeel oo dabiici ah, isuna tusmaysan, kuna kala taagan labo waran ee isku weydaaranaya caaradda hoose ee gashaanka, ayna weheliyaan labo caleencawbaar oo dabiici ah, diilin cadina ay ay ku qoofalan tahay.

3. Magaalo Madaxda Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya waa Muqdisho (Xamar).

### Qod. 3aad

### (Diinta iyo Afka)

1. Diinta Islaamku waa Diinta Qaranka
2. Af Soomaaligu waa afka qur ah oo Shacbiga Soomaaliyeed ku wada hadlo, iskuna wada garto, Afka Carabiguna waa Afka Shacbiga Soomaaliyeed, waana midka ku xiriiriya Ummadda Carbeed oo uu ka midka yahay, labadubana waa afafka rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

### Qod. 4aad

### (Midnimada Shacbiga Soomaaliyeed)

1. Shacbiga Soomaaliyeed waa shacbi mid ah, Jinsiyadda Soomaaliyeedna waa mid qura



2. Sharciga ayaa xaddidaya sida lagu helayo ama lagu waayayo jinsiyadda Soomaaliyeed.

### Qod. 5aad

### (Dhulka Qaranka)

1. Dhulka Qaranku waa muqaddas, waana laguma xadgudbaan.
2. Gobannimada dhulku waxay koobaysaa berriga, jasiiradaha, biyaha goboleed, dhulka iyo badda uurkooda hoose, hawada sare iyo xeebaleyda.

### Qod. 6aad

### (Sinnaanta Muwaadiniinta)

Muwaadiniinta oo dhan, iyagoon loo eegin lab iyo dheddig, diin, dhalasho iyo af toona, xuquuqda iyo waajibaadkaba waa u simman yihiin sharciga hortiisa.

## XUBINTA LABAAD

## XISBIGA

### Qad. 7aad

### (Awoodda iyo hoggaaminta Xisbiga)

1. Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed waa midka qur ah ee ka jira Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soo-

maaliya, lamana abuuri karo xisbi kale ama urur siyaasi ah.

2. Xisbiga Hantiwaagga Kacaanka Soomaaliyeed ayaa leh awoodda ugu sareysa ee hoggaaminta siyaasadda, dhaqaalaha iyo bulshada Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

### Qod. 8aad

### (Midnimada hoggaanka dalka)

Hoggaaminta Dalku waxay ku dhisan tahay midnimada hoggaanka siyaasadeed ee Xisbiga iyo kan Qaranka.

### Qod. 9aad

### (Doodaha, go'aanka iyo fulinta)

1. Hay'adaha siyaasadeed ee la doortaa waxay ku shaqeynayaan, heer kasta oo ay yihiin, mabda'a WADARTA DOODAHA, AQLABIYADDA GO'AANKA iyo U WADAJIRKA FULINTA.

2. Hay'adaha Xisbiga dhexdooda, mabda'aasi wuxuu farayaa aragti, dareen iyo doonis mideysan iyo iskuduubni shaqo.

### Qod 10aad

### (Iskaabidda waajibaadka Xisbiga iyo Qaranka)

1. Hay'adaha Xisbiga iyo kuwa Qaranku



waxay qabanayaan hawlaha mid kasta u gaarka ah ee sharciyadu tilmaamayaan, iyaagoo u maraya jidad kala duwan, si ay u gaaraan ujeeddo mid ah.

2. Abaabulka siyaasadeed ee Dalku wuxuu ku dhisan yahay iskaabidda waajibaadka hay'adaha Xisbiga iyo kuwa Qaranka, sida sharciyada ay ku dhisan yihiin tilmaamayaan.

### Qod. 11aad

### (Xeerka Xisbiga)

Qaabka dhismaha hay'adaha Xisbiga iyo shaqadooda waxaa caddeynaya Xeerka Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed.

### Qod. 12aad

### (Ururrada Bulshada)

1.- Qaranku wuxuu jideynayaa dhismaha ururro bulsho oo ka kooban dhallinyaro, shaqaale, iskaashatooyin iyo haween.

2. Ururrada bulshadu waxay u dhismayaan heer Qaran, heer degaan, heer wax soo soo saar iyo xarun waxbarasho.

3. Dhismaha, Xeerarka iyo Barnaamijyada gaar ahaaneed ee Ururrada Bulshadu waa in ay waafaqsanaadaan danaha guud ee Dadweynaha, Dastuurka, Xeerka iyo barnaamijka Xisbika Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed.

### Qod· 13aad

### (Awoodda iyo waajibaadka Ururrada Bulshada)

Ururrada Bulshadu waxay Ka qaybgalayaan, si waafaqsan waajibaadka xeerarkooda gaar ahaaneed u xilsaarayaan, hoggaaminta arrimaha Qaranka iyo Bulshada, iyo xallinta arrimaha la xiriira siyaasadda, dhaqaalaha, bulshada iyo dhaqanka.

### Qod. 14aad

### (Diimooqraadiyadda Guddoonka Dhexe)

Abaabulka iyo hawlaha Xisbiga iyo Qarankaba waxaa saldhig u ah Mabda'a Diimooqaraadiyadda Guddoonka - Dhexe.

## XUBINTA SADDEXAAD

## (SIYAASADDA DIBEDDA)

### Qod 15aad

### (Mabda'a Aayakatalinta)

1· Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxay aaminsan tahay Mabda'a aayakatalinta dadyowga Adduunka, waxayna si buuxda u taageereysaa dhaqdhaqaaqyada gobanimadoonka iyo dhammaan dadyowga u halgamaya xornimadooda iyo madax bannaanidooda.



2. Waxay si adag uga soo horjeeddaa gumeysiga, gumeysiga cusub, imberyaaliyadda caalamiga ah iyo midabtakoorka.

### Qod. 16aad

### (Dalalka Soomaaliyeed ee la gumeysto)

Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, iyadoo ku isticmaaleysa dariiq nabadgelyo iyo qaanuun, waxay taageereysaa xoreynta Dalalka Soomaaliyeed ee weli ku jira gacanta gumeysiga, waxayna soo dhaweyneysaa midowga Shacbiga Soomaaliyeed ee ku yimaadda dariiq nabadeed iyo rabitaanka dadka ay khuseyso·

### Qod. 17aad

### (Siyaasadda dex-dhexaadka iyo nabad-kuwadanoolaashada)

1. Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxay ku soconeysaa siyaasadda dhexdhexaadka wax ku oolka ah.

2. Waxay si buuxda u aqoonsan tahay mabda'a nabad-kuwadanoolaashada Dadyowga Adduunka·

### Qod. 18aad

### (Siyaasadda wax-wada-qabsiga)

Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxay horumarineysaa siyaasadda wax-

wada-qabsiga Dadyowga iyo Qarammada Adduunka ee ku dhisan kala faa'ideysiga, sinnaanta iyo xurmeynta Gobannimada iyo habka siyaasadeed ee qola kasta u gaarka ah

### Qod. 19aad

### (Qaanuunka Dawliga ah)

Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Sooomaaya waxay aqoonsantahay Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadamiga iyo Qaanuunka Dawliga ah ee guud ahaan la aqoonsan yahay.

## QAYBTA LABAAD

## XUQUUQDA, XORRIYAADKA IYO WAAJIBAADKA ASAASIGA AH EE MUWAADINKA IYO QOFKA

### Qod. 20aad

### (Xuquuqda siyaasiga, dhaqaalaha, bulshada iyo hiddaha)

Muwaadin kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu ka qaybgalo hawlaha siyaasadeed, dhaqaale, bulsho iyo hiddahaba, si waafaqsan Dastuurka iyo Shuruucda.

### Qod. 21aad

### (Xaqa shaqada)

1. Muwaadin kasta wuxuu xaq u leeyahay



shaqo. Shaqadu waa waajib, sharaf iyo saldhigga Bulshada Hantiwadaagga ah.

2. Qaranku wuxuu horumarinayaa abuuris-ta goobo shaqo si loo xaqiijiyo xaqa muwaadinka ee shaqada.

### Qod. 22aad

### ( Xaqa doorashada )

Muwaadin kasta oo buuxiya shuruudaha sharcigu tilmaamayo wuxuu xaq u leeyahay in uu wax doorto, lana doorto.

### Qod. 23aad

### (Xaqa tacliinta)

Muwaadin kasta wuxuu xaq u leeyahay tacliin lacag la'aan ah.

### Qod. 24aad

### (Xorriyadda bannaanbaxa, faafinta qoraallada iyo ra'yiga)

1. Muwaadin kasta wuxuu xor u yahay in uu ka qayb galo kulan, bannaanbax ama abaabulkooda.

2. Wuxuu kaloo muwaadinku xor u yahay daabacaadda qoraallada, hadalka iyo bandhigga ra'yigiisa si kastaba ha ku muujiyee.

3. Ku isticmaalka xorroyadaha ku qoran lambarka 1aad iyo 2aad ee Qodobkan waa ineysan ka hor imaan Dastuurka iyo Shuruucda Dalka, anshaxa guud iyo xasilloonida Dalka, waxna u dhimin xorriyadaha muwaadiniinta kale.

### Qod. 25aad

### (Xaqa nolosha iyo nabadgelinta qofka)

1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay noloshiisa iyo nabadgelinta qofnimadiisa.

2. Sharciga ayaa tilmaamaya xaaladaha qofku ku muteysan karo ciqaab dil.

### Qod. 26aad

### (Xorriyadda qofnimo)

1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay xorriyaddiisa shakhsiga ah.

2. Qofna lama xiri karo, xorriyaddiisa qofnimana ciriiri lama gelin karo, haddii aan loogu imaan isagoo denbi faraha kula jira, ama aan lagu qaban amar ka soo baxay Hay'adaha Garsoorka ee awoodda sharciyeed u leh, iyadoo la raacayo habka Sharcigu tilmaamayo.

3. Qofkii nabadsugid awgeed loo xiro, waa in si deg deg ah loo horgeeyo Hay'adaha Garsoorka ee awoodda sharciyeed u leh



dembiga loo haysto, muddada sharcigu farayo dhexdeeda.

4. Qof kasta ee xorriyaddiisa shakhsiga ah laga qaado waa in isla markiiba la ogeysiiyaa dembiga lagu tuhunsan yahay.

5. Qofna shakhsi ahaan looma baari karo haddii aysan jirin shuruudaha ku tilmaaman lambarka 2aad ee Qodobkan ama shuruucda ku saabsan arrimaha la xiriira garsoorka, caafimaadka iyo maaliyadda, ama nabadgelyo awgeed, iyadoo markasta la raacayo habka Sharcigu tilmaamayo, lana dhowrayo sharafka iyo xurmada qofka.

### Qod. 27aad

### (Nabadgelinta qofka xorriyaddiisa shakhsiga ah laga qaado)

1. Qofka xorriyaddiisa shakhsiga ah laga qaado looma geysan karo waxyeello jirkiisa ama moralkiisa.

2. Ciqaabta jirku waa mamnuuc.

### Qod. 28aad

### (Lahaanshaha gaar ahaaneed)

1. Lahaanshaha gaar ahaaneed waa la damaana qaadayaa Sharciga ayaana xaaddidaya dariiqadda lagu kasbi karo ama lagu waayi karo, nuxurkeeda iyo xuduud-

da isticmaalkeeda si loo ilaaliyo dowrka bulshadeed ee ay leedahay.

2. Isticmaalka lahaanshaha gaar ahaaneed waa in uusan marna wax u dhimin danta guud ee bulshada, waana in uusan ka hor imaan ujeeddoyinka Kacaanka.

3. Lahaanshaha gaar ahaaneed waxaa la-gula wareegi karaa dan guud awgeed, gebi ahaanteed ama si ku meel gaar ah. iyadoo qofkii lahaa la siinayo cawilcelin munaasib ah.

**Qod. 29aad**

**(Xurmada hoyga)**

Qofna gurigiisa ama meeshii kale ee isa-ga u gaar ah lama geli karo, haddii aysan jirin shuruudaha ku xusan lambarrada 2aad iyo 5aad ee Qodobka 26aad.

**Qod. 30aad**

**(Xorriyadda isgaarsiinta)**

Qarsoodiga warqadaha iyo waxyaalaha kale ee war isgaarsiinta la xiriira lama fara gelin karo, haddii aysan jirin shuruudaha sharcigu tilmaamayo.

**Qod. 31aad**

**(Xorriyadda diinta)**

Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu



rumeeyo diinta ama caqiiddadii kale ee uu aamminsan yahay.

**Qod. 32aad**

**(Xaqa dacwada iyo isdifaaca)**

1 Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu dacwad sharciga waafaqsan ka furto Maxkamadda awoodda u leh.

2. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu iska daafaco Maxkamadda horteeda.

3. Xaaladaha Sharcigu tilmaamayo, Qaran-ku wuxuu kafaala qaadayaa inuu bixiyo difaac lacag la'aan ah.

**Qod. 33aad**

**(Mas'uuliyadda ciqaabta)**

1. Mas'uuliyadda ciqaabtu waa shakhsi.

2. Eedeysanuhu wuxuu la mid yahay qof aan dembi gelin ilaa Maxkamadi si kama dambeys ah ugu caddeyso dembiga loo haysto.

**Qod. 34aad**

**(Dib u noqosho la'aanta Sharciga Ciqaabta)**

Qofna looma ciqaabi karo fal markii uu ku kacay sharcigu dembi uusan u aqoonsa-

neyn, sida aan loogu xukumi karin ciqaab aan sharciga ku xuśnayn.

### Qod. 35aad

### (Isucelinta eedeysanaha ama dembiilaha iyo magangelyada siyaasadeed)

1. Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya dib waa u celin kartaa qof dembi ka soo galay dalkiisa ama dal kale oo ku soo cararay Dalka Soomaaliyeed, haddii uu jiro heshiis dhexmaray Qaranka Soomaaliyeed iyo kan soo weydiistay celinta eedeysanaha ama dembiilaha·

2· Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxay siin kartaa xaq magangelyo siyaasadeed qofkii uga soo carara dalkiisa ama dal kale cadaadin siyaasadeed awgeed, isagoo u halgamaya daryeelka danaha dadweynaha, xuquuqda aadamiga ama nabadgelyada.

### Qod. 36aad

### (Ilaalinta hantida guud)

Muwaadin kasta waxaa waajib ku ah ilaalinta iyo xoojinta hantida guud.

### Qod. 37aad

### (Ka qaybgalka kobcinta dhaqaalaha Dalka)

Qof kasta waxaa waajib ku ah inuu ka



qayb qaato kobcinta dhaqalaha Dalka, bixinta cashuuraadka iyo ka qaybgalka kharashka Qaranka si waafaqsan awooddiisa iyo shuruucda Dalka.

### Qod. 38aad

### (Difaaca Dalka Hooyo)

Difaaca Dalka Hooyo iyo adkeynta midnimada shacbiga Soomaaliyeed waa waajib muqaddas ah oo saaran muwaadin kasta.

### Qod· 39aad

### (Dhowrista Dastuurka iyo Shuruucda)

Qof kasta waxaa waajib ku ah inuu si daacad ah u dhowro Dastuurka iyo shuruucda Qaranka·

## QAYBTA SADDEXAAD

## SALDHIGGA DHAQAN DHAQAALE

## XUBINTA KOOWAAD

## DHAQAALAHA

### Qod. 40aad

### (Horumarinta dhaqaalaha)

1. Qaranku wuxuu horumarinayaa dhaqaalaha dalka iyo kordhinta wax soo saarka, isla markaana wuxuu xaqiijinayaa in si

caddaalad ah dadweynaha wax loogu qaybsho.

2. Si loo dedejiyo horumarinta Dalka, Qaranku wuxuu dhiirrigelinayaa Mabda'a Iskaa Wax U Qabso.

### Qod. 41aad

### (Qaybaha dhaqaalaha)

Dhaqaalaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya wuxuu ka koobmaa qaybaha soo socda :

— QAYBTA HANTIDA QARANKA :

oo ah horseedka horumarinta dhaqaalaha Dalka, lehna, mudnaan gaar ah;

— QAYBTA HANTIDA ISKAASHATOOYINKA :

oo lagu horumarinayo dhaqaalaha xubnaha Iskaashatooyinka, isla markaana lagu kobciyo dhaqaalaha guud ee Dalka, Qarankuna qorshadeeda iyo dhiirrigelinteeda ka qayb galo;

— QAYBTA HANTIDA GAAR AHAANEED: oo ah lahaansho gaar ahaaneed ee aan ku dhisnayn iskudulnoolaasho;

— QAYBTA HANTIDA ISKU DHAFKA AH:

oo ah hanti ay wada leeyihiin Qaranka Soomaaliyeed iyo cid kale.



### Qod. 42aad

### (Kharyraadka dhulka iyo badda)

1. Dhulka, khayraadka dabiiciga ah iyo kuwa badda iyo berrigaba, waa hanti Qaran.
2. Sida ugu habboon oo kheyraadkaas looga faa'iideysanayo Qaranka ayaa sharci ku habeynaya.

### Qod. 43aad

### (Qorshaha dhaqaalaha)

1. Dhaqaalaha Dalku wuxuu ku dhisan yahay qorshe Qaran ee Hantiwadaag ah.
2. Qorshuhu wuxuu leeyahay awood sharci oo ka sarreysa tan shuruucda kale.
3. Waxaa jireysa hay'ad sare ee qorshaha qaranka, Sharciga ayaana tilmaamaya qaabka dhismaheeda, waajibaadkeeda iyo awoodeeda.

### Qod. 44aad

### (Ganacsiga dibedda iyo gudaha)

Qaranku wuxuu hoggaaminayaa ganacsisiga dibedda iyo gudaha, isagoo ku hirgelinaya horumarinta dhaqaalaha Dalka.

### Qod. 45aad

### (Ilaalinta lacagta)

Qaranku wuxuu habeynayaa nidaamka

maaliyadda iyo lacagta ee Dalka, wuxuuna sharci ku goynayaa cashuuraha.

## XUBINTA LABAAD
## HORUMARINTA TACLIINTA, CILMIGA IYO ADABKA

### Qod. 46aad

### (Tacliinta)

1. Qaranku wuxuu mudnaan gaar ah siinayaa horumarinta, ballaarinta iyo faafinta tacliinta iyo cilmiga, wuxuuna tacliinta u arkaa maalgelinta ugu habboon ee kaalinta ugu weyn ka qaadaneysa horumarinta siyaasadda, dhaqaalaha iyo bulshada soomaaliyeed.

2. Tacliinta Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waa mid u daneyneysa dabaqadda xoogsatada ah, kuna habeysan waayaha iyo degaanka gaar ahaaneed ee Bulshada Soomaaliyeed.

3. Tacliinta farsamada iyo xirfaddu waxay leeyihiin mudnaanta koowaad.

### Qod. 47aad

### (Tacliinta khasabka ah)

Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya tacliintu waa lacag la'aan, waana khasab ilaa iyo dhammaadka dugsiga dhexe.



### Qod. 48aad

### (Ciribtirka jahliga)

Ciribtirka qoris iyo akhris la'aanta iyo waxbarashada dadka waaweyn waa waajib ummadeed, waana in Dadweyne iyo Qaranba awoodda la isugu geeyaa fulinta waajibkaas.

### Qod. 49aad

### (Horumarinta cilmiga iyo adabka)

1. Qaranku wuxuu horumarinayaa cilmiga iyo adabka, wuxuuna dhiirrigelinayaa hindisaha cilmiga iyo adabka.
2. Xuquuqda qoraalka iyo hindisaha sharciga ayaa habeynaya.

### Qod. 50aad

### (Dhallinyarada iyo isboortiga)

Si dhallinyarada loogu xaqiijiyo koritaan jir iyo maskaxeed ee caafimaad qaba, barbaarintooda iyo garaadkooda siyaasadeedna kor loogu qaado, Qaranku wuxuu ahmiyad gaar ah siinayaa horumarinta iyo dhiirrigelinta ciyaaraha jirka iyo isboortiga.

## XUBINTA SADDEXAAD

## DHAQANKA IYO DARYEELKA BULSHADA

### Qod. 51aad

**(Horumarinta hiddaha iyo dhaqanka)**

1. Qaranku wuxuu horumarinayaa hiddaha iyo dhaqanka horusocodka ah ee Shacbiga Soomaaliyeed, iyadoo isla markaa laga faa'iideysanayo aqoonta caalamiga ah ee bulshada aadamiga.

2. Wuxuu dhiirrigelinayaa fanka, suugaanta iyo ciyaaraha waddaniga ah ee dadweynaha.

3. Wuxuu ilaalinayaa, daryeelayaa, waxyaabaha iyo xarumaha Taariikhiga ah ee Dalka.

### Qod. 52aad

**(Caadooyinka Bulshada)**

Qaranku wuxuu dhawrayaa caadooyinka hagaagsan, wuxuuna bulshada ka xoreynayaa caadooyinka haraaga ah, iyo kuwa laga dhaxlay gumeysiga, gaar ahaan qabyaaladda eexda, goboleysiga.

### Qod. 53aad

**(Xannanada Dhallaanka)**

Qaranku wuxuu horumarinayaa guryaha



xannaanada carruurta iyo xarumaha dhallinta Kacaanka.

### Qod. 54aad

**(Horumarinta Miyiga)**

Qaranku wuxuu xoojinayaa barnaamijka Joogtaynta Ololoha Horumarinta Reer Miyiga si loo tirtiro jahliga, laysuguna soo dhaweeyo nolosha reer miyiga iyo reer magaalka .

### Qod 55aad

**( Caafimaadka )**

Qaranku, isaagoo fulinaya siyaasadda daryeelka caafimaadka guud, wuxuu xoojinayaa ka hortagga cudurrada faafa, daryeelka nadaafadda guud iyo daaweynta lacag la'aanta ah.

### Qod. 56aad

**( Daryeelka Qoyska )**

1. Qaranku wuxuu daryeelayaa Qoyska isagoo u arkaya aasaaska bulshada, wuxuuna taakuleynayaa hooyada iyo ilmaha.

2. Qaranku wuxuu xil iska saarayaa xannaanada naafada, carruurta aan waalidkood la aqoon iyo dadka duqooba, haddeyan lahayn cid kale ee xannaanaysa.

3. Qaranku wuxuu kafaala qaadayaa carru-

urta waalidkood ku geeriyoodo difaaca Dalka.

### Qod. 57aad

### (Shaqada iyo Shaqaalaha)

1. Qaranku wuxuu dhowrayaa, horumarinayaana shaqada iyo noocyadeeda kala duwan.

2. Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, da'da ugu yar ee shaqada loo qaadan karo waa 15 sano.

3. Xoogsatadu waxay xaq u leeyihiin, iyadoo aan sina loo kala soocin, mushaar u dhigma hawsha ay qabtaan iyo qiimaheeda.

4. Xoogsatadu waxay xaq u leeyihiin nasasho toddobaad iyo fasax sannadeed.

5. Sharcigu wuxuu xaddidayaa saacadaha shaqada, habka iyo dadka loo qaadan karo shaqooyinka qaarkood.

### Qod. 58aad

### (Qiimeynta Shaqada)

Qiimeynta Shaqada Qaranku wuxuu ku dabbaqayaa mabda'a: QOF KASTA INTA AY KARTIDIISU LA EG TAHAY INUU QABTO, QOF KASTANA INTA AY SHAQADIISU LA EG TAHAY INUU QAATO.



### Qod. 59aad

### (Taakuleynta iyo badbaadinta Bulshada)

Qaranku wuxuu horumarinayaa habka taakuleynta iyo badbaadinta Bulshada, wuxuuna xoojinayaa hay'adaha caymiska guud ee Dalka.

## QAYBTA AFRAAD

## QAABKA DHISMAHA QARANKA

## MADAXA KOOWAAD

## GOLAHA SHACBIGA

### Xubinta Koowaad

### NIDAAMKA IYO HAWLAHA GOLAHA SHACBIGA

### Qod. 60aad

### (Awoodda sharci dejinta)

Awoodda sharci dejinta Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxay gaar u tahay Golaha Shacbiga.

### Qod. 61aad

### (Doorashada Golaha Shacbiga)

1. Golaha Shacbigu wuxuu ka kooban yahay xildhibaanno Dadweynuhu ku soo doortay madaxbannaani, toos iyo qarsoodi.

2. Xilka Xildhibaannimada Golaha Shacbiga waxaa loo dooran karaa qofkastoo Soomaali ah oo da'diisu ay gaartay 21 sano. Sharciga ayaa xaddidaya xaaladaha qofka aan la dooran karin.

3. Tirada Xildhibaannada, shuruudaha iyo habka doorashada waxaa tilmaamaya sharci gaar ah.

4 Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya wuxuu u magacaabi karaa Xildhibaanimada Golaha Shacbiga ilaa lix qof oo laga dhex xulo dadka si gaar ah ugu soocmay goobaha cilmiga, adabka iyo fanka, ama leh qiimo sare ee waddaninimo.

## Qod 62aad

## (Muddada xilka)

1. Muddada xilka Golaha Shacbigu waa shan sano, laga bilaabo maalinta la soo saaro natiijada doorashada.

2. Markii ay timaaddo duruuf suurta gelin weyda in doorasho la qabto, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, isagoo la tashaday Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed wuxuu awood u leeyahay inuu muddada ku kordhiyo waqti aan hal sano ka badneyn.



## Qod. 63aad

## (Kala diridda Golaha Shacbiga )

1. Golaha Shacbiga waa la kala diri karaa isagoon waqtigiisu dhammaan, marka ay talo ku soo jeediyaan saddex meelood meel xildhibaannada Golahu, ayna isku raacaan saddex meelood laba.

2. Waxaa kale oo kala diri kara Madaxweynaha Jamhuuriyadda, isagoo la tashaday Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed iyo Guddiga joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

3. Doorashada Golaha cusubi waxay dhacaysaa saddex bilood gudahood laga bilaabo maalinta lagu dhawaaqo go'aanka kala dirka Golaha.

## Qod. 64aad

## (Kalfadhiyada)

1. Golaha Shacbigu sannadkiiba wuxuu yeelanayaa laba kalfadhi.

2. Goluhu wuxuu isugu imaan karaa fadhi aan caadi ahayn markii uu sidaas go'aan ku gaaro Guddiga Joogtada ah, ama ay codsadaan saddex meelood meel Xildhibaannada Goluhu.

3. Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimo-

qraadiga Soomaaliya wuxuu awood u leeyahay inuu Golaha isugu yeero fadhi aan caadi ahayn.

### Qod. 65aad

### (Fadhiyada iyo go'aannada Golaha)

1. Golaha Shacbigu wuxuu fadhigiisa ugu horreeya ka dhex dooranayaa xubnihiisa Guddoomiye, Guddoomiye Ku-Xigeenno iyo Guddiga Joogtada ah.

2. Fadhiyada Goluhu waa u furan yihiin dadweynaha. Hase yeeshee fadhiyo qarsoodi ah waa la qaban karaa haddii ay soo jeediyaan Madaxweynaha Jamhuuriyadda, Guddiga Joogtada ah, Dawladda ama ugu yaraan afar meelood meel xildhibaannada, Goluhuna oggolaado.

3. Fadhiga Goluhu wuxuu ku ansaxayaa marka ay ka soo qaybgalaan Xildhibaannada intooda badan.

4. Go'aannada Goluhu waxay ku ansaxayaan cod hal dheeri ah haddii Dastuurka ama Sharcigu uusan tilmaamin aqlabiyad gaar ah.

### Qod 66aad

### (Xeer Hoosaadka Golaha)

Habka shaqada Golaha Shacbiga waxaa lagu nidaaminayaa Xeer Hoosaadka Goluhu guddonsado.



### Qod 67aad

### ( Awoodaha Golaha )

Golaha Shacbigu wuxuu leeyahay awoodaha soo socda:-

1. Wax ka beddelidda Dastuurka Dalka;

2. Dejinta shaciyada iyo oggolaashaha go'aannada saameeya horumarka Dalka;

3. Doorashada iyo xil ka qaadidda Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya sida ku cad Qod. 80aad ee Dastuurka;

4. Doorashada iyo xil ka qaadidda Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

5. Oggolaashada heshiisyada caalamiga ah ee ku saabsan siyaasadda, dhaqaalaha, ganacsiga,ama heshiisyada Qaranka u keenaya masuuliyad lacageed.

6. Hubinta dhawridda Dastuurka iyo sharciyada Dalka;

7. Oggolaashaha qorshaha horumarinta dhaqaalaha Dalka;

8. Oggolaashaha miisaaniyadda sannadka iyo miisaanayadda xisaabxirka.

9. La xisaabtanka Dawladda iyo xubnaheeda;

10. Awoodaha kale ee Dastuurku siiyey Golaha..

## Qod. 68aad

### (Xilsaarasho Sharci dejin)

1. Golaha Shacbigu wuxuu Dawladda u wakiilan karaa inay ka soo saarto sharci, waqti xaddidan gudahiis, arrimo la isla meel dhigay. Sharciga xilsaarashada waa lagu tilmaami karaa mabaadi'da ama tusaalooyinka in Dawladdu raacdo loo baahan yahay.

2. Sharciga Dawladda loo wakiishay waxaa lagu soo saarayaa xeer Madaxweyne.

## Qod. 69aad

### (Sharciyada degdegga ah)

1. Markii ay jiraan duruuf gaar ahaaneed ee degdeg ah, Dawladdu waxay dejin kartaa sharci leh dhaqan ku meel gaar ah oo lagu soo saaro Xeer Madaxweyne. Muddo bil ah gudaheed waa in sharcigaas lagu hor geeyaa Golaha Shacbiga, ama Guddiga Joogtada ah, si looga dhigo mid rasmi ah.

2. Golaha Shacbigu, haddii uu kulansan yahay, ama Guddiga Joogtada ah, marka uusan Goluhu kulansaneyn, waa in ay go'aan ka gaaraan 15 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda Sharciga la soo hordhigay.



## Qod. 70aad

### ( Mashruuc Sharci )

Mashruuc Sharci waxaa soo jeedin kara Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, Guddiga Joogtada ah ama Dawladda. Waxaa kaloo soo jeedin kara xildhibaannada Golaha Shacbiga haddi ay soo jeedintaa isku raacaan saddex meelood meel xildhibaannada Goluhu.

## Qod. 71aad

### (Sharciyada Saameynaya Istraateejiyada Xisbiga)

Mashruuc sharci oo kasta ee saameynaya istraateejiyada Xisbigu ku xaqiijinayo himilooyinka Kacaanka iyo nidaamka uu Dalka ku hoggaaminayo waa in Golaha Dhexe ee Xisbigu soo oggolaadaa, inta aan Golaha Shacbigu go'aan kama dambeys ah ka gaarin.

## Qod. 72aad

### (Soo saaridda iyo faafinta Sharciga)

1. Sharci kasta ee Golaha Shacbiga ama Guddiga Joogtada ah isku raaco waxaa soo saaraya Madaxweynaha shaniyo-afartan maalmood dhaxdood.

2. Madxaweynaha Jamhuuriyadda Dimoqradiga Soomaaliya wuxuu awood u

leeyahay, muddada ku xusan lambarka 1aad ee qodobkan dhexdeeda, in uu sharcigaas dib ugu celiyo Golaha Shacbiga, isagoo sababta raacinaya, codsanayana in dib looga doodo, go'aanna laga gaaro.

3. Haddii Goluhu mar kale saddex meelooddoo laba xubnihiisa sharcigaas isku raaco, Madxweynuhu waa inuu ku soo saaraa shan iyo afartan maalmood gudahood.

4. Sharciga Goluhu isku raaco, Madaxweynuhuna soo saaro, waxaa lagu baahinayaa Faafinta Rasmiga ah, wuxuuna dhaqan galayaa 15 maalmood kaddib marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah, haddusan sharcigu muddo ka duwan sheegin.

### Qod. 73aad

### (Xildhibaanka)

1. Xildhibaan kasta wuxuu masilayaa danta guud ee Shacbiga Soomaaliyeed.

2. Xildhibaanku marka uu hawsha Golaha bilaabayo wuxuu marayaa dhaarta soo socota :

«Waxaan magaca Ilaahey iyo kan Waddanka ku marayaa inaan ammaano, kalsoni iyo hagar la'aan ugu adeego Shacbiga Soomaaliyeed, inaan fuliyo mabaadi'da Kacaanka 21ka Oktoobar 1969, inaan dhawro Dastuurka iyo Shuruucda Dalka, inaan hirgeliyo mabaadi'da Hantiwadaagga, inaan ilaaliyo danta guud ee Shacbiga iyo danaha Qaranka Soomaaliyeed, inaan kartideyda oo dhan ku daafaco madaxbannaanida, gobannimada iyo midnimada Dalka, inaan danta guud ka hormariyo danteyda gaar ahaaneed, inaan dadka Soomaaliyeed ku dhaqo sinnaan iyo caddaalad».



3. Xildhibaanka dhibaato kama soo gaari karto fikradaha iyo aaraada uu ka hor dhiibto Golaha iyo Guddiyadiisa isagoo gudanaya xilkiisa.

4. Xildhibaanka Golaha laguma qaadi karo dacwad ciqaabeed, lama xiri karo, lamana baari karo qof ahaan ama hoygiisa, haddaan lagu qaban isagoo dembi faraha kula jira, ama laga haysan oggolaasho Golaha Shacbiga, markuusan kulansaneenna Guddiga Joogtada ah isagoo dib uga ansaxinaya Golaha Shacbiga.

5. Xildhibaanka Goluhu wuxuu xilkiisa gudanayaa isagoo wata hawlihiisii hore ee caadiga ahaa. Inta ay socdaan kalfadhiyadu ama marka loo diro hawl la xiriirta xilka Golaha, Xildhibaanku wuxuu xaq u yeelanayaa gunno lagu xaddidi doono sharci gaar ah.

### Qod. 74aad

### (Xil ka qaadidda Xildhibaanka)

1. Xildhibaan kasta ee oofin waaya shu-

ruudaha Xildhibaannimada, ama ka soo bixi waaya waajibaadka xilkiisa la xiriira, waxaa laga qaadayaa xilka.

2. Xildhibaan kasta Dadweynihii soo doortay waa kala noqon karaan kalsoonidooda, waxaana codsigaas soo jeedin kara afar meelood meel doortayaasha.

3. Xil ka qaadidda Xildhibaanka waxaa hal dheeri xubnihiisa ku guddoominaya Golaha Shacbiga.

**Qod. 75aad**

**(Kormeeridda Golaha)**

1. Xildhibaan kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu u jeediyo Dawladda ama Xubnaheeda su'aalo iyo afti oo ay waajib ku tahay inay ka jawaabaan labaatan maalmood gudahood.

2. Goluhu wuxuu **amri** karaa in baaris la sameeyo isagoo u xilsaaraya waajibkaas guddiyo ka kooban Xildhibaannadiisa.

XUBINTA LABAAD

GUDDIGA JOOGTADA AH

**Qod. 76aad**

**(Xilka Guddiga Joogtada ah)**

Guddiga Joogtada ah waa hay'adda hog



gaamisa hawlaha Golaha, wuxuuna qabtaa xilka Golaha Shacbiga, muddada u dhexeysa kalfadhiyada, marka laga reebo awoodaha ku xusan Qod. 67aad, lambarradiisa 1, 3, 7 iyo 8, iyo Qod. 82aad, lambarradiisa 3 iyo 12 ee Dastuurka.

**Qod. 77aad**

**(Xubnaha Guddiga Joogtada ah)**

1. Guddiga Joogtada ah wuxuu ka kooban yahay xubnaha soo socda :

— Guddoomiye;
— Guddoomiye Ku-xigeenno;
— Xoghaye iyo
— Toban xubnood.

2. Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Ku-xigeennada Golaha Shacbiga ayaa noqonaya Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Ku-xigeennada Guddiga Joogtada ah.

**Qod. 78aad**

**(Awoodda Guddiga Joogtada ah)**

Guddiga Joogtada ah wuxuu leeyahay awoodaha soo socda :

1) Dejinta iyo wax ka beddelidda Sharciyada muddada u dhexeysa kalfadhiyada Golaha, isagoo kaddib ka ansaxinaya Golaha Shacbiga;

2) Fasiraadda Sharciyada iyo go'aannada Goluhu soo saaro;

3) Isugu yeeridda kalfadhiyada iyo fadhiyada aan caadiga ahayn ee Golaha Shacbiga;

4) Ilaalinta maamulka doorashada Xildhibaannada Golaha Shacbiga;

5) Wax alla wixii awood ah ee Dastuurku siiyey ama Golaha Shacbigu u xil saaro.

## MADAXA LABAAD

## MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

### Qod. 79aad

### (Madaxa Qaranka)

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waa madaxa Qaranka, wuxuuna masilaa awoodda Qaranka iyo midnimada Shacbiga Soomaaliyeed.

### Qod. 80aad

### (Doorashada iyo muddada xilka)

1. Madaxweynaha Jamhuuriyadda waxaa soo sharraxaya Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed, Golaha Shacbiga ayaana dooranaya.



2. Doorashada Madaxweynaha waa in ay isku raacaan saddex-meelood laba Xildhibaannada Golaha Shacbiga, aftida kowaad iyo labaad. Aftida saddexaad waxaa ku filan cod hal dheeri ah Xildhibaannada Golaha.

3. Golaha Shacbigu waa casili karaa Madaxweynaha isagoo raacaya hababka ku xusan lambarka koowaad iyo labaad ee Qodobkan.

4. Madaxweynaha Jamhuuriyaddu wuxuu xilka haynayaa lix sano laga bilaabo maalinta la dhaariyo, dibna waa loo dooran karaa.

5. Marka uu hawsha bilaabayo, Madaxweynaha Jamhuuriyaddu wuxuu marayaa dhaarta ku xusan Qod. 73aad ee Dastuurka.

### Qod. 81aad

### (Shuruudda Doorashada)

Waxaa loo dooran karaa jagada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya qof kastoo Soomaali ah, aabihii iyo hooyadiina Soomaaaali asal ah yihiin, horey aan u guursan, intuu xilka hayana guursanin, qof aan Soomaali asal ah ahayn, lehna shuruudaha lagu dooran karo xildhibaanka Golaha Shacbiga, da'diisuna gaartay afartan sano.

## Qod. 82aad

### ( Awoodda iyo Hawlaha Madaxweynaha )

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya awoodaha iyo hawlaha Dastuurka iyo Sharciyadu siinayaan waxaa u wehliya kuwa soo socda :

1. masilaadda xiriirka Qaranku la leeyahay dibedda;
2. masilaadda midnimada hoggaanka siyaasadeed ee Xisbiga iyo Qaranka;
3. meelmarinta heshiisyada caalamiga ah ee saameynaya difaaca iyo nabadda, qarannimada iyo madaxbannaanida Jamhuuriyadda, kaddib marka ay oggolaadaan Golaha Dhexe ee Xisbiga iyo Golaha Shacbiga;
4. meelmarinta heshiisyada kale ee caalamiga ah;
5. qaabilaadda iyo aqoonsiga danjirayaasha iyo madaxda ergooyinka shisheeyaha;
6. guddoominta shirarka ay u wada jiraan hay'adaha Xisbiga iyo kuwa Qaranku;
7. magacaabidda iyo xil ka wareejinta Wasiirrada iyo Wasiirro Ku-xigeennada;
8. magacaabidda iyo xil ka wareejinta Guddoomiyaha Maxkamadda Sare iyo Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka isagoo dhegeystay talada Golaha Dhexe ee Xisbiga:
9. magacaabidda iyo xil ka qaadidda saraakiisha sare ee Qaranka, isagoo dhegeystay talada Golaha Wasiirrada;
10. inuu bixiyo masaabax, ciqaabtana dhimo;
11. waa Taliyaha Sare ee Ciidammada Qalabka Sida iyo Guddoomiyaha Guddiga Difaaca Qaranka;
12. ku dhawaaqidda xaaladaha dagaalka iyo nabadda, kaddib marka ay go'aamiyaan Golaha Dhexe ee Xisbiga iyo Golaha Shacbigu;
13. inuu dadweynaha u bandhigo afti markii ay Dalka la soo gudboonaadaan arrimo muhiim ah;
14. inuu soo saaro xeerar Madaxweyne;
15. bixinta billadaha iyo aqoonsiyada mudnaanta ee kale.

## Qod. 83aad

### (Awoodda aan caadiga ahayn ee Madaxweynaha)

1. Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya wuxuu awood u leeyahay, isagoo la tashaday Guddiga Difaaca Qaranka, inuu xukun degdeg ah ku soo

rogo, tilaabo kasta oo ku habboonna ka qaado, Dalka guud ahaantiis ama qayb ka mid ah, marka ay la soo gudboonaadaan arrimo khatar gelinaaya qarannimada, nabadgelyada gudaha ama dibedda ee Dalka, ama markasta oo ay jirto baahi lagama maarmaan ah.

2. Xaaladaha dagaalka, Madaxweynuhu wuxuu la wareegayaa awoodda Dalka oo dhan, ku dhaqanka qodobbada Dastuurka ee aan la socon karin xaaladahaasna waa la laalayaa.

### Qod. 84aad

### (Madaxweyne Ku-xigeen)

1. Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya wuxuu magacaabi karaa Madaxweyne Ku-xigeen ama Madaxweyne Ku-xigeenno, isagoo dhegeystey ra'yiga Golaha Dhexe ee Xisbiga iyo Golaha Shacbiga.
2. Madaxweyne Ku-xigeenku marka uu hawshiisu bilaabayo, wuxuu marayaa dhaarta ku xusan Qod.73aad ee Dastuurka.

### Qod. 85aad

### (Xil gudasho karid la'aan)

1. Marka ay geeri ku timaaddo, ama shaqo ka fariisad, ama sabab joogto ah ee ka reebeysa Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya inuu xilkiisa guto, waxaa la dooranayaa Madaxweyne cusub lixdan casho gudahood, iyadoo la raacayo habka ku xusan Qodobka 80aad ee Dastuurka.



2. Inta ay doorashada Madaxweynaha cusub ka dhacayso iyo markastoo ay jiraan sababo aan joogto ahayn ee ka reebaya Madaxweynaha inuu guto xilkiisa, waxaa jagadiisa sii haynaya Madaxweyne Ku-xigeenka koowaad ee Jamhuuriyadda.

## MADAXA SADDEXAAD

## DAWLADDA

## XUBINTA KOOWAAD

## MAAMULKA DAWLADDA DHEXE

### Qod. 86aad

### (Golaha Wasiirrada)

1. Golaha Wasiirradu waa hay'adda ugu sarreysa fulinta maamulka Dawladda.
2. Golaha Wasiirradu wuxuu ka kooban yahay Guddoomiyaha Golaha Wasiirrada iyo Wasiirrada.
3. Guddoomiyaha Golaha Wasiirrada waxaa noqonaya Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

4. Madaxweynuhu wuxuu magacaabi karaa, haddii ay la habboonaato, Wasiir Koowaad.

### Qod. 87aad

### (Awoodda Golaha Wasiirrada)

Awoodaha Dastuurka iyo Sharcigu siinayo ka sokow, Golaha Wasiirradu wuxuu leeyahay awoodaha soo socda :

1. inuu hor dhigo Golaha Shacbiga talooyin sharci;
2. inuu jiheeyo, iskuna duwo, kormeerana hawlada Dawladda;
3. inuu soo saaro xeerar;
4. inuu hoggaamiyo hawlaha la xiriira difaaca iyo nabadgelyada Qaranka;
5. inuu diyaariyo miisaaniyadda sannadka iyo xisaab xirkeeda;
6. inuu dejiyo qorshaha lagu horumarinaayo dhaqaalaha Dalka;
7. inuu la galo heshiisyo waddammada dibedda iyo hay'adaha caalamiga ah;
8. inuu qaado tallaabo kastoo uu ku ilaalinaayo danta Qaranka iyo nabadgelyada dadweynaha, isagoo dhowraya xadka Dastuurku u gooyey awooddiisa.



### Qod. 88aad

### (Nidaamka Dawladda)

1. Awoodaha iyo xilka Golaha Wasiirrada ee aan Dastuurkan ku xusneyn, tirada iyo xilka wasaaradaha, waxaa lagu caddeynayaa sharci gaar ah.
2. Habka dhismaha Golaha Wasiirrada, Wasaaradaha iyo Xafiisyada la xiriira, waxaa lagu nidaaminayaa Xeer Madaxweyne.

### Qod. 89aad

### (Mas'uuliyadda ciqaabeed ee Wasiirrada)

1. Wasiirradu waxay mas'uul ka yihiin dembiyada ka dhasha fulinta xilkooda.
2. Shariciga ayaa tilmaamaya habka Wasiirrada loogu qaadayo dembiyada ka dhasha fulinta xilkooda iyo dembiyada kaleba.

### Qod. 90aad

### (Dhaarta)

Xubnaha Dawladda, marka ay xilkooda billaabayaan, waxay Madaxweynaha Jamhuuriyadda hortiisa ku marayaan dhaarta ku xusan Qod. 73aad ee Dastuurka.

### Qod. 91aad

### (Barnaamijka Dawladda)

Dawladdu magacaabiddeeda kaddib, wa-

xay Golaha Dhexe ee Xisbiga iyo Golaha Shacbiga soo hordhigeysaa barnaamijka ay dooneyso inay hirgeliso.

### Qod. 92aad

### (Wasiirro Ku-xigeenno)

Wasiirrada waxaa xilkooda ku kaalin kara Wasiirro Ku-xigeenno uu magacaabo Madaxweynaha Jamhuuriyadda, isagoo dhegeystay talada Golaha Wasiirrada.

## XUBINTA LABAAD

## BAAHINTA AWOODDA IYO MAAMULKA DALKA

### Qod. 93aad

### (Fidinta Maamulka)

Xilka maamuleed ee Qaranka waxaa lagu fidinayaa, inta ay suurta gal tahay, maamulka hoose iyo wakaaladaha.

### Qod. 94aad

### (Maamulka Hoose ee Qaranka)

1. Awoodda maamulka hoose waa qayb ka mid ah awoodda Maamulka Dhexe ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

2. Sharciga ayaa u nidaaminaya awoodda maamulka hoose, si waafaqsan mabda'a dimoqraadiyadda guddoonka dhexe.



### Qod. 95aad

### (Golayaasha Shacbiga ee Degaanka)

1. Dadweynuhu si toos ah ayuu u dooranayaa Xubnaha Golayaasha Shacbiga ee Degaanka .

2. Sharcigu wuxuu tilmaamayaa dhismaha, awoodda, ilaha dhaqaale iyo xiriirka Golayaasha Shacbiga ee Degaanku la leeyihiin Xisbiga, Golaha Shacbiga iyo Dawladda.

## MADAXA AFRAAD

## GARSOORKA

## XUBINTA KOOWAAD

## MABAADI'DA GARSOORKA

### Qod. 96aad

### (Ujeeddada Garsoorka)

1. Maxkamadaha iyo Xeer Ilaalintu waxay ilaalinayaan nidaamka Qaranka Hantiwadaagga ah iyo dhismihiisa bulsho.

2. Maxkamadaha iyo Xeer Ilaalintu gudashada xilkooda, waxay ku barbaariyaan muwaadinka Soomaaliyeed inuu ka qayb qaato dhismaha Dalka, difaaca nidaamka Hantiwadaagga, dhawrista sharciyada,

habka wada noolaashada bulshadeed iyo daacadnimo u gudashada waajibaadka Qaranka iyo Bulshadu ku leeyihiin.

3. Garsooruhu wuxuu sugaa dhawridda sharciyada, wuxuuna kafaalo qaadaa ilaalinta xorriyadda, xuquuqda iyo nolosha muwaadinka, danaha iyo sharafta qofka aadadamiga ah.

**Qod. 97aad**

**(Midnimada Garsoorka)**

Garsoorka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waa mid mideysan.

**(Qod. 98aad**

**(Madaxbannaanida Garsoorka)**

Garsoorayaasha Maxkamadaha iyo xeer-Ilaaliyayaashu waa u madax bannaan yihiin hawshooda, lagama qaadi karo xilka, xaaladaha Sharcigu tilmaamay mooyaane, waxayna u hoggaansamayaan Sharciga oo keliya.

**Qod. 99aad**

**(Doodaha Maxkamadaha)**

1. Doodaha Maxkamaduhu, mabda' ahaan, waa tiraab, dadweynuhuna waa dhegeysan karaa. Sharciga ayaa tilmaamaya xaaladaha Maxkamadaha albaabka loo xiri karo.



2. Xukunka Maxkamadaha waxaa lagu soo saarayaa Magaca Dadweynaha Soomaaliyeed.

XUBINTA LABAAD

MAXKAMADAHA

**Qod. 100aad**

**(Maxkamadaha Jamhuuriyadda)**

1. Maxkamadaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waa kuwa soo socda: Maxkamadda Sare, Maxkamadaha Rafcaanka, Maxkamadaha Gobollada, Maxkamadaha Degmooyinka, Guddiyada Garsoorka ee goobaha shaqada iyo Maxkamadaha Ciidammada Qalabka Sida.

2. Waxaa la dhisi karaa Maxkamado gaar ah ee awooddooda iyo dhismahooda lagu jideeyey Sharci.

3. Guddiyada Garsoorka ee Maxkamadaha waxaa ka qayb gala Garsoorayaal dadweyne ee Sharci gaar ah lagu dhisay.

**Qod. 101aad**

**(Maxkamadda Sare)**

Maxkamadda Sare waa hay'adda ugu sarreysa Garsoorka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya. Waxay habeysaa, kormeertana hawlaha Maxkamadaha oo dhan.

### Qod. 102aad

### (Habka shaqada Maxkamadaha)

Habka shaqada Maxkamadaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo magacaabidda Garsoorayaasha waxaa nidaaminaya sharci gaar ah.

## XUBINTA SADDEXAAD

## ( XEER ILAALINTA )

### Qod. 103aad

### (Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka)

1. Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranku waxay ka kooban tahay: Xeer Ilaaliyaha Guud iyo Kuxigeennadiisa.
2. Qaabka Dhismaha Xeer Ilaalinta Guud iyo Hawlaha Xubnahaheeda waxaa nidaaminaaya Sharci gaar ah.

### Qod. 104aad

### (Xilka Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka)

1. Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranku waxay ilaalisaa ku dhaqanka dhabta ah ee Sharciyada Dalka.
2. Waxay hubisaa in go'aannada, awaamirta iyo tusaalooyinka Hay'adaha Qaranku waafaqsan yihiin Dastuurka iyo Sharciyada Dalka.



3. Waxay dacwad ku oogtaa qofkii gala fal dembi ah.
4. Waxay kormeertaa Xabsiyada iyo xarumaha dib u edbinta carruurta.
5. Waxay ilaalisaa xuquuqda Dadka tabarta yar.
6. Waxay fulisaa hawlihii kale ee Sharcigu u xilsaaro.

## XUBINTA AFRAAD

## GOLAHA SARE EE GARSOORKA

### Qod. 105aad

### (Xilka Golaha Sare ee Garsoorka)

1. Golaha Sare ee Garsoorku waa hay'adda hoggaamisa siyaasadda iyo maamulka Guud ee Garsoorka.
2. Golaha Sare ee Garsoorku wuxuu talo ka dhiibtaa masaabaxa Madaxweynaha Jamhuuriyaddu bixiyo, magacaabidda, beddelka, dallacaadda iyo shaqo ka fariisinta Garsoorayaasha iyo Xeer Ilaaliyaasha.
3. Wuxuu kormeeraa hawlqabadka iyo anshaxa Garsoorayaasha iyo Xeer Ilaaliyayaasha.
4. **Dhismaha Golaha Sare ee Garsoorka iyo habka shaqadiisa waxaa nidaaminaya sharci gaar ah.**

### Qod. 106aad

### (Guddoominta Golaha Sare ee Garsoorka)

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqqraadiga Soomaaliya ayaa ah Guddoomiyaha Golaha Sare ee Garsoorka.

## XUBINTA SHANAAD
## MAXKAMADDA DASTUURKA

### Qod. 107aad

### ( Dastuuriyadda Shuruucda )

1. Waxaa jireysa Maxkamad Dastuur oo awood u leh in ay go'aan ka gaarto dastuuriyadda shuruucda.

2. Maxkamadda Dastuurku waxay ka koobantaa Maxkamadda Sare oo ay kaabayaan Xubno ka tirsan Golaha Shacbiga ee uu magacaabo Madaxweynuhu, isagoo dhegeystay talada Guddiga Joogtada ah.
3. Habka shaqada, tirada xubnaha iyo muddada xilka ee Maxkamadda Dastuurka waxaa nidaaminaya sharci gaar ah.

## QAYBTA SHANAAD
## DIFAACA IYO NABADGELYADA DALKA

### Qod. 108aad

### (Xilka Ciidammada Qalabka Sida)

1. Ciidammada Qalabka Sida waxay ilaaliyaan gobannimada iyo madaxbannaanida Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxay guulaha iyo miraha Kacaanka ka ilaaliyaan cadawga gudaha iyo kan dibedda, waxay sugaan nabadgelyada iyo xasil-



loonida gudaha, kaalin ka qaataan dhismaha Dalka.
2. Qaranku wuxuu xoojinayaa awoodda iyo aqoonta farsamo ee Ciidammada Qalabka sida, koı u qaadidda garaadkooda siyaasadeed, k beeridda ruuxa waddaninimo iyo naf u huridda Dhulka Hooyo.

### Qod. 109aad

### (Dhismaha Ciidammada Qalabka Sida)

Sharci gaar ah ayaa tilmaamaya dhismaha iyo qaabka ay u habeysan yihiin Ciidammada Qalabka Sida.

### Qod. 110aad

### (Guddiga Difaaca Qaranka)

1. Guddiga Difaaca Qaranka xilkiisu wuxuu yahay inuu qiimeeyo Xaaladaha la xiriira difaaca iyo nabadgelyada Dalka, gurmadiyana wax kasta oo waxtar u leh haqabtirka baahida difaaca Dalka.

2. Guddiga Difaaca Qaranka waxaa Guddomiye ka ah magacaabana xubnihiisa kale, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

3. Sharciga ayaa tilmaamaya awoodda Guddiga Difaaca Qaranka waqtiga nabadda iyo dagaalkaba.

## QAYBTA LIXAAD

## QODOBBO KALA DUWAN

### Qod. 111aad

### ( Saldhigga Shuruucda )

1. Dastuurku wuxuu leeyahay awoodda sharci ee ugu sareeysa.

2. Dhammaan Shuruucda, Xeerarka iyo awaamirta hay,adaha Qaranka waxaa saldhig u ah Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waana in ay waafaqsanaadaan.

### Qod. 112aad

### (Wax ka baddelka Dastuurka)

1. Talo wax ka beddel Dastuurka waxaa soo jeedin kara: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, Golaha Dhexe ee Xisbiga ama saddex meelood meel Xildhibaannada Golaha Shacbiga.

2. Golaha Shacbigu wax ka beddelka Dastuurka wuxuu ku guddoominayaa go'aan ay isku raacaan saddex meelood laba xubnahiisa.

3. Wax ka beddelka Dastuurka ma saameyn karo arrimaha soo socda:

   a) nidaamka Jamhuuriyadnimada ee Dalka;



   b) doorashada mabda'a Hantiwadaagga;

   t) midnimada dhulka;

   j) xuquuqda iyo xorriyadaha aasaasiga ah ee muwaadinka iyo qofka.

### Qod. 113aad

### (Ku Dhaqan ku meel gaar ah)

1. Sharciyada hadda jira waa lagu sii dhaqmayaa, iyadoo intooda aan Dastuurka wafaqsaneyn lagu beddeli doono hal sano gudaheeda.

2. Ilaa iyo inta laga dhisaayo hay'adaha Dastuurkani tilmaamayo, awoodahoodii waxaa sii fulinaya hay'adaha imminka Dalka ka jira.

### Qod. 114aad

### (Dhaqangalka Dastuurka)

Dastuurku wuxuu dhaqan galayaa laga bilaabo maalinta la soo saaro natiijada aftida oggolaashaha Shacbiga.

TUSMADA DASTUURKA

QAYBTA KOOWAAD

MABAADI' GUUD

XUBINTA KOOWAAD

*Jamhuuriyadda*


Bogga

Qod. 1aad — Qaranka Soomaaliyeed . 1

Qod. 2aad — Calanka, astaanta iyo magaalo - madaxda . . 1

Qod. 3aad — Diinta iyo afka . . . 2

Qod. 4aad — Midnimada Shacbiga Soomaaliyeed . . . . 2

Qod. 5aad — Dhulka Qaranka . . . 3

Qod. 6aad — Sinnaanta muwaadiniinta . . . . . . . . 3


XUBINTA LABAAD

XISBIGA


Qod. 7aad — Awoodda iyo hoggaaminta Xisbiga . . . . 3

Qod. 8aad — Midnimada hoggaanka Dalka . . . . . . . 4

Qod. 9aad — Doodaha, go'aanka iyo fulinta . . . . . . . 4

Qod. 10aad — Iskaabidda waajibaadka Xisbiga iyo Qaranka . . 4

Qod. 11aad — Xeerka Xisbiga . . . 5





Qod. 12aad — Ururrada Bulshada . . 5

Qod. 13aad — Awoodda iyo waajibaadka Ururada Bulshada 6

Qod. 14aad — Dimoqraadiyada Guddoonka Dhexe . . . . 6


XUBINTA SADDEXAAD

*Siyaasadda Dibedda*


Qod. 15aad — Mabda'a aayakatalinta . . 6

Qod. 16aad — Dalalka Soomaaliyeed ee la gumeysto . . . . 7

Qod. 17aad — Siyaasadda dhex-dhexaadka iyo nabadkuwada noolaashada . . . . 7

Qod. 18aad — Siyaasadda wax wada qabsiga . . . . . . 7

Qod. 19aad — Qaanuunka Dawliga ah 8


QAYBTA LABAAD

XUQUUQDA, XORRIYAADKA IYO WAAJIBAADKA ASAASIGA AH EE MUWAADINKA IYO QOFKA


Qod. 20aad — Xuquuqda Siyaasiga, Dhaqaalaha, Bulshada iyo Hiddaha . . . . . 8

Qod. 21aad — Xaqa Shaqada . . . . 8

Qod. 22aad — Xaqa Doorashada . . . 9

Qod. 23aad — Xaqa Tacliinta . . . 9

Qod. 24aad — Xorriyadda bannaanbaxa, faafinta qoraallada iyo ra'yiga . . . . . 9

Qod. 25aad — Xaqa nolosha iyo nabadgelinta qofka . . . 10

Qod. 26aad — Xorriyadda qofnimo . . 10

Qod. 27aad — Nabadgelinta qofka xorriyaddiisa shakhsiga ah laga qaado . . . . . 11

Qod. 28aad — Lahaanshaha Gaar ahaaneed . . . . . . 11

Qod. 29aad — Xurmada hoyga . . . 12

Qod. 30aad — Xorriyadda isgaarsiinta 12

Qod. 31aad — Xorriyadda Diinta . . 12

Qod. 32aad — Xaqa dacwadda iyo isdifaaca . . . . . . 13

Qod. 33aad — Mas'uuliyadda ciqaabta 13

Qod. 34aad — Dib u noqosho la'aanta sharciga ciqaabta . . . 13

Qod. 35aad — Isucelinta eedeysanaha ama denbiilaha iyo magangelyada siyaasadeed 14

Qod. 36aad — Ilaalinta hantida guud . 14

Qod. 37aad — Ka qaybgalka kobcinta dhaqaalaha Dalka . . 14

Qod. 38aad — Difaaca Dalka hooyo . 15



Qod. 39aad — Dhawrista Dastuurka iyo Shuruucda . . . . 15

QAYBTA SADDEXAAD

SALDHIGGA DHAQAN DHAQAALE

XUBINTA KOOWAAD

*Dhaqaalaha*

Qod. 40aad — Horumarinta dhaqaalaha . . . . . . 15

Qod. 41aad — Qaybaha dhaqaalaha . 16

Qod. 42aad — Kheyraadka dhulka iyo badda . . . . . . . 17

Qod. 43aad — Qorshaha dhaqaalaha . 17

Qod. 44aad — Ganacsiga dibedda iyo gudaha . . . . . . 17

Qod. 45aad — Ilaalinta Lacagaha . . 17

XUBINTA LABAAD

HORUMARINTA TACLIINTA IYO CILMIGA

Qod. 46aad — Tacliinta . . . . . . 18

Qod. 47aad — Tacliinta khasabka ah . 18

Qod. 48aad — Ciribtirka jahliga . . . 19

Qod. 49aad — Horumarinta cilmiga iyo adabka . . . . . 19

Qod. 50aad — Dhallinyarada iyo isboortiga . . . . . . . 19

XUBINTA SADDEXAAD

DHAQANKA IYO DARYEELKA

BULSHADA


Qod. 51aad — Horumarinta hiddaha iyo dhaqanka . . . . 20

Qod. 52aad — Caadooyinka bulshada . 20

Qod. 53aad — Xannaanada dhal-laanka . . . . . . . 20

Qod. 54aad — Horumarinta miyiga . 21

Qod. 55aad — Caafimaadka . . . . 21

Qod. 56aad — Daryeelka qoyska. . . 21

Qod. 57aad — Shaqada iyo Shaqaa-laha . . . . . . . 22

Qod. 58aad — Qiimeynta Shaqada . . 22

Qod. 59aad — Taakuleynta iyo bad-baadinta bulshada . . 23


QAYBTA AFRAAD

QAABKA DHISMAHA QARANKA

MADAXA KOOWAAD

*Golaha Shacbiga*

XUBINTA KOOWAAD

*Nidaamka iyo hawlaha Golaha Shacbiga*


Qod. 60aad — Awoodda sharci dejinta 23

Qod. 61aad — Doorashada Golaha Shacbiga . . . . . . . 23





Qod. 62aad — Muddada xilka . . . 24

Qod. 63aad — Kala diridda Golaha Shacbiga . . . . . . 25

Qod. 64aad — Kalfadhiyada . . . . 25

Qod. 65aad — Fadhiyada iyo go'aan-nada Golaha . . . . 26

Qod. 66aad — Xeer hoosaadka Golaha 26

Qod. 67aad — Awoodda Golaha . . . 27

Qod. 68aad — Xilsaarasho sharci dejin 28

Qod. 69aad — Sharciyada degdegga ah 28

Qod. 70aad — Talo-sharci . . . . . 29

Qod. 71aad — Sharciyada saameeya istraateejiyada Xisbiga . 29

Qod. 72aad — Soo-saaridda iyo faafin-ta sharciga . . . . . 29

Qod. 73aad — Xildhibaanka . . . . 30

Qod. 74aad — Xil ka qaadidda Xil-dhibaanka . . . . . 31

Qod. 75aad — Kormeeridda Golaha . 32


XUBINTA LABAAD

GUDDIGA JOOGTADA AH


Qod. 76aad — Xilka Guddiga Joog-tada ah . . . . . . 32

Qod. 77aad — Xubnaha Guddiga Joog-tada ah . . . . . . . 33

Qod. 78aad — Awoodda Guddiga Joog-tada ah . . . . . . 33

MADAXA LABAAD

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA


Qod. 79aad — Madaxa Qaranka . . . 34

Qod. 80aad — Doorashada Madaxweynaha . . . . . . 34

Qod. 81aad — Shuruudda doorashada 35

Qod. 82aad — Hawsha iyo Awoodaha Madaxweynaha . . . 36

Qod. 83aad — Awoodda aan caadiga ahayn ee Madaxweynaha . . . . . . . . . 37

Qod. 84aad — Madaxweyne Ku-xigeennada . . . . . . . 38

Qod. 85aad — Xil gudasho karid la'aan . . . . . . . . 38


MADAXA SADDEXAAD

DAWLADDA

XUBINTA KOOWAAD

*Maamulka Dawladda Dhexe*


Qod. 86aad — Golaha Wasiirrada . . 39

Qod. 87aad — Awoodda Golaha Wasiirrada . . . . . . . 40

Qod. 88aad — Nidaamka Dawladda . 41

Qod. 89aad — Mas'uuliyadda ciqaabeed ee Wasiirrada . . 41





Qod. 90aad — Dhaarta . . . . . . 41

Qod. 91aad — Barnaamijka Dawladda . . . . . . . . 41

Qod. 92aad — Wasiirro Ku-xigeenno . 42


XUBINTA LABAAD

BAAHINTA AWOODAHA IYO MAAMULKA DALKA


Qod. 93aad — Fidinta maamulka . . 42

Qod. 94aad — Maamulka Hoose ee Qaranka . . . . . . 42

Qod. 95aad — Golayaasha Shacbiga ee Degaanka . . . . . 43


MADAXA AFRAAD

GARSOORKA

XUBINTA KOOWAAD

*Mabaadi'da Garsoorka*


Qod. 96aad — Ujeeddada Garsoorka . 43

Qod. 97aad — Midnimada Garsoorka . 44

Qod. 98aad — Madaxbannaanida Garsoorka . . . . . . 44

Qod. 99aad — Doodaha Maxkamadaha 44


XUBINTA LABAAD

MAXKAMADAHA


Qod. 100aad — Maxkamadaha Jamhuuriyadda . . . . . . 45

Qod. 101aad — Maxkamadda Sare . . 45

Qod. 102aad — Habka Shaqada Maxkamadaha . . . . 46

XUBINTA SADDEXAAD

(XEER ILAALINTA)

Qod. 103aad — Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka . . . . . . 46

Qod. 104aad — Xilka Xeer Ilaalinta Guud . . . . . . 46

XUBINTA AFRAAD

GOLAHA SARE EE GARSOORKA

Qod. 105aad — Xilka Golaha Sare ee Garsoorka . . . . . 47

Qod. 106aad — Guddoominta Golaha Sare ee Garsoorka . . 48

XUBINTA SHANAAD

MAXKAMADDA DASTUURKA

Qod. 107aad — Dastuuriyadda Shuruucda . . . . . . . 48

QAYBTA SHANAAD

DIFAACA IYO NABADGELYADA DALKA

Qod. 108aad — Xilka Ciidammada Qalabka Sida . . . . . 48

Qod. 109aad — Dhismaha Ciidammada Qalabka Sida . . . . 49



Qod. 110aad — Guddiga Difaaca Qaranka . . . . . . . 49

QAYBTA LIXAAD

QODOBBO KALA DUWAN

Qod. 111aad — Saldhigga Sharciyada Dalka . . . . . . . 50

Qod. 112aad — Wax ka beddelka Dastuurka . . . . . . 50

Qod. 113aad — Ku dhaqan ku meel gaar ah . . . . . . 51

Qod. 114aad — Dhaqangalka Dastuurka 51

Waxaa lagu Daabacay
Wakaaldda Madbacadda Qaranka
MUQDISHO

SANDRA: 20385 XII.